JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, DIB-U-DHISKA & GURIYEYNTA

HINDISE-SHARCIYEEDKA

XAMUULKA IYO XADEYNTA CABBIRKA BAABUURTA

Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska& Guriyeynta 2018

TUSMO

QEYBTA I: QODOBBO HORDHAC AH 4
Qodobka 1aad:MagacaSharciga 4
Qodobka 2aad: Eray-bixin 4
Qodobka 3aad: Ujeeddada Sharciga 7
Qodobka 4aad: Wajibaadka Wasiirka 7
Qodobka 5aad: Magacaabidda Saraakiisha Idman 8
Qodobka 6aad: Awoodaha Saraakiisha Idman 8
Qodobka 7aad: Wakiilasho Shaqooyinka Wasaaradda 8
Qodobka 8aad: Heshiishyada Wakaaladda 9
Qodobka 9aad: Mag-dhawgaWakiillada 9
QEYBTA II: MIISAANKA UGU BADAN EE BAABUURTA 10
Qodobka 10aad: Rakibaadda Qalabka Miisaanka 10
Qodobka 11aad: Waajibnimada Miisaamidda Baabuurta 10
Qodobka 12aad: Wadaha BaabuurkuWaa Inuu QaatoAwaamirta Sarkaalka Idman 10
Qodobka 13aad: Habka Miisaamidda 10
Qodobka 14aad: Cabirrada Miisaanka 11
Qodobka 15aad: Soo-saaridda Oggolaansho gaar ah 11
Qodobka 16aad: Xamuulka aan Caadiga ahayn 12
Qodobka 17aad: Shuruudaha Qaadidda Xamuulka aan Caadiga ahayn ama Xad-dhaafka ah 12
Qodobka 18aad: Shuruudaha Dheeriga Ah Ee Qaadidda Xamuulka Xad-dhaafka ah 13
Qodobka 19aad: Rar-ka-dejin 13
Qodobka 20aad: Dembiyada Xamuulka Xad-dhaafka ah 13
Qodobka 21aad: Ogeysiinta Xamuulka Xad-dhaafka ah iyo Bixinta Ganaaxyada 14
Qodobka 22aad: Hab-raaca Xakameynta Xamuulka Xad-dhaafka ah 15
Qodobka 23aad:Mas'uuliyaddaXadidaaddaGanaaxa Xamuulka Xad-dhaafka ah 16
Qodobka 24aad: Ciqaabta Maamul ee Xamuulka Xad-dhaafka ah .. 16
Qodobka 25aad: Ka Cafin Miisaamid DuruufoGaar ahAwgood 16
Qodobka 26aad: Rafcaan 16
QEYBTA III:XADKA CABBIRKA DHINACYADA BAABUURTA IYO CULEYSKA CANDHADA 17
Qodobka 27aad: Xadka Cabbirka Dhinacyada Baabuurta 17
Qodobka 28aad: Xadka Miisaanka Baabuurta 18
Qodobka 29aad: Ballaca Iyo Culeyska Ugu Badan Ee Baabuurta 19
Qodobka 30aad: Mamnuucid Rarka iyo Dhinacyada Baabuurta Ee Xadka Sharciga Dhaafsan 19
QEYBTA IV: WAXYEELLEYNTA DHISMEYAASHA DANTA GUUD 19
Qodobka 31aad: Soo-saaridda Shahaadada Kharashka 19
Qodobka 32aad: Kharashka Dib-u-hagaajinta 19
Qodobka 33aad: Qaadidda Ganaaxyada 20

QEYBTA V: QODOBBO QUBANE AH..... 20
Qodobka 34aad: Xeyndaabka Dabaqaadda Sharciga..... 20
Qodobka 35aad: Aqoonsi Isku-mid Ah Ee Shahaadooyinka Miisaamidda..... 20
Qodobka 36aad: Ganaaxyada Ugu Yar Ee Laga Qaado Rarka Xad-dhaafka ah..... 20
Qodobka 37aad: Wareegto 20
QEYBTA VI QODOBBO KAMA-DAMBAYSAH.....26
Qodobka 38aad: Xilliga Kala-Guurka Ah.....26
Qodobka 39aad: Baabi'in.....26
Qodobka 40aad: Dhaqan-gal.....26
JADWAL..... 22
QEYBTA (A) (a.29 (1))..... 22
Cabbirka iyo Culeyska Ugu Badan Ee Baabuurta 22
Xadka Sharciga Ah Ee Gawaarida 23
Culeyska Ugu Badan Ee Candhada Ee La Oggol Yahay 30
Culeysyada Ugu Badan Ee Baabuurta..... 23
QEYBTA (B) (a.36)..... 24

QEYBTA I
QODOBBO HORDHAC AH

Qodobka 1aad
MagacaSharciga

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "***Sharciga Xamuulka iyo Xadeynta Cabbirka Baabuurta***".

Qodobka 2aad
Eray-bixin

Erayadan hoos ku qoran, haddii aan Sharcigan dhexdiisa si kale loogu macneyn, wuxuu mid walba yeelanayaa eray-bixinta ku hor qoran:

- "***Xamuul Xad-dhaaf ah*"** waxaa loola jeedaa Rar aan kala qeybsamin oo xad-dhaaf ah, kana badan xadka culeyska sharcigu oggolyahy, kaasoo daabuliddiisu u baahan tahay oggolaansho gaar ah;
- "***Ansixin***" waxaa loola jeedaa meel-marintaWasiirka;
- "***Baabuurta Tareellayaasha ah***" waxaa loola jeedaa baabuur-matoor oo wata rimoor aan horay candho ku lahayn oo ku xiriirsan qeybta hore, qeybtaas oo noqonaysa meesha matoorku ku yaal, ahna qeybta muhiimka ah ee miisaanka rimoorka iyo culeyskiisa;
- "***Sarkaalka Idman***" waxaa loola jeedaa qof uu Wasiirku qoraal ku magacaabo si uu u guto waajibaadka sharcigani dhigayo, hadba inta Wasiirku u idmado;
- "***Culeys xad-dhaaf ah***" waxaa loola jeedaa culeys, marka loo eego isaga ama konteenarka lagu qaadayo, ay adagtahay in la qaado ama la keydiyo, culeyskaasoo lakala qeybin karo oo aan ahayn xamuul xad-dhaaf ah, waxaana kamid ah maaddada laamiga, dareerayaasha is-beddela ama gaasaska iyo cuntooyinka dhaqso isu beddela;
- "***Culeyska Candhada***" waxaa loola jeedaa culeyska ku gudba waddooyinka oo lagu qaado candho leh labo ama in kabadan taayarrada aariyada ama gaaska laga buuxiyey;
- "***Waax Candho***" waxaa loola jeedaa:
  b) Qeyb ka kooban labo candho ama in ka badan ee baabuur leeyahay oo laysku xiro si ay u noqdaan hal walax; ama
  t) Marka loo eego ujeedka "bedka lugaha (wheelbase)", haddii uu yahay rimoorka la jiidayo, labo candho ama in ka badan, ha xiriiraan ama yeysan xiriine haddii masaafada u dhexeysa candhooyinka isku xiriirsan tahay wax ka yar hal mitir iyo labo senti-mitir (l.2m);
- "***Candho***" waxaa loola jeedaa qalab, ku wareegsan ballarka baabuurka taasoo lugaha baabuurtu ay ku wareegaan oo loo dhigay si marka baabuurku u socdo dhanka hore ay si qummaati ah u sinnaanayaan xariijimaha (laymanka) toosan ee bartamaha taayarradu si la mid ah xaglaha toosan ee baabuurka ilaa dhexda dherarka baabuurka;
- "***Culeyska Cabbirka Candhada***" waxaa loola jeedaa isku darka mugga culeyska ay leeyihiin dhammaan lugaha ku xiran hal candho;
- "***Baabuur ganacsi***" waxaa loola jeedaa baabuur leh matoor oo loo sameeyey ama laga dhigay mid daabula badeecadaha iyo culeysyada nooc

walba leh ee gancsi kasta, kuwaasoo aysan ku jirin nooc kasta ee baabuurta matoorka leh ee lagu baahiyey faafinta rasmiga ah ee wasiirka, kuwaas oo ay caddahay in aysan ahayn baabuur ganacsi si waafaqsan ujeeddooyinka sharcigan;

- "***Ganacsade***" waxaa loola jeedaa qof ka ganacsada baabuurta matoorka leh iyo rimoorrada la jiido;
- "***Wakiil magacaaban***" waxaa loola jeeda qof wasiirku qoraal ku magacaabo si uu u guto waajibaadka iyo awoodaha loo xilsaaray;
- "***Xadka Cabbirka***" waxaa loola jeedaa ballaarka/ballaca, dherarka iyo joogga la oggol yahay ee baabuurta hadba sida uu wasiirku jideeyo, iyadoo sharcigan la raacayo;
- "***Culeyska guud ee Candhada***" waxaa loola jeedaa culeyska ugu badan ee candhada baabuurka hadba sida warshadii sameysay tilmaantay ama haddii la waayo tilmaamaha warshada, sida wasaaraddu go'aamiso;
- "***Xadka guud culeyska Baabuurka***" waxaa loola jeedaa miisaanka matoorka baabuurka ama rimoorka la jiido oo ay wehliyaan joogga xamuulka iyo wixii dad ama hanti saaran;
- "***Koox candhooyin ah***" waxaa loola jeedaa candhooyin ka badan hal oo kuwada xiran baaxad u dhaxeysa candhooyinka oo ah 1.2 mitir ilaa 2.5 mitir;
- "***Baabuur ganacsi oo culus***" waxaa loola jeedaa baabuur ganacsi oo markuu maran yahay miisaankiisu ka badan yahay 6720 (lix kun todobo boqol iyo labaatan) rodol;
- "***Isku-xiriirsan***" waxaa loola jeedaa marka loo eego "waax candho" naqshadda loo sameeyey oo keeneysa in awoodda kor u baxda ee hal "waax candho" u gudubto hoos si ay u gaarto qeybaha kale ee isla waaxda candho;
- "***Isku-xiran***" waxaa loola jeedaa baabuur ka kooban madax iyo rimoor isku-xiran;
- "***Miisaan la sido***" waxaa loola jeedaa miisaanka baabuurka iyo xamuulka uu sido marka baabuurka rarka loo dhammeeyo ee uu diyaar u yahay in uu dhaqaaqo, waxaana ku jira miisaanka wadaha iyo qof kasta oo saaran;
- "***Xadka Xamuulka ee sharciga ah***" waxaa loola jeedaa xadka ay qaadi karto hal candho, koox candhooyin ama dhammaan candhooyinka baabuurka ee wasiirku tilmaamo si sharcigan waafaqsan;
- **"*Warshadeeye***" waxaa loola jeedaa warshada soo saartay baabuurka iyo rimoorka la jiido;
- "***Wasiir***" waxaa loola jeedaa Wasiirka Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyeynta;
- **"*Gaari-matoor*"** waxaa loola jeedaa baabuurta uu matoorku dhaqaajiyo;
- "***Ganaaxa rarka dheeriga ah***" waxaa loola jeedaa qaddar lacag ah oo la xiriirta heerarka raridda xad-dhaafka ah, waana ganaax uu bixinayo milkiilaha baabuurka ama cidda ku shaqeyneysa baabuurka sida xad-dhaafka ah loo raray ee dhaafsan xadka sharcigu oggol yahay;
- "***Joogga guud ee Baabuurka***" waxaa loola jeedaa dherarka u dhexeeya marka laga soo cabbiro dhulka ilaa qeybta ugu sarreysa ee:
  b) Qeyb kasta oo kamid ah baabuurka, ama
  t) Xamuul kasta;

- "***Dherarka guud***" waxaa loola jeedaa dherarka baabuurka keliya laga billaabo dhegta dambe ilaa afka (koofanaha) hore ee baabuurka;
- "***Ballaarka guud***" waxaa loola jeedaa ballaca marka laga cabbiro inta u dhexeysa dhinacyada si isla siman, laga soo billaabo dhinaca ugu shisheeya baabuurka ilaa muraayadda wadaha hagta;
- "***Dul-xir***" waxaa loola jeedaa masaafada marka la cabbiro si-dadban dhinacyada baabuurka ee ku teedsan dherarkiisa cirifkasta;
- "***Xamuul xad-dhaaf ah***" waxaa loola jeedaa in isu-geynta candhooyinka baabuurka ama xadka culeyska guud ee baabuurku ka badan yahay xadka sharcigu oggol yahay qeyb kasta ee jidadka danta guud;
- "***Milkiile***" waxaa loola jeedaa milkiilaha diiwan-gashan ama qofka gacanta ku haya baabuurka la kireeyey;
- "***Dhismeyaal***" waxaa loola jeedaa dhismeyaasha degaan ama ganacsi oo ay kamid yihiin xarumaha shidaalka, carwooyinka laga dukaameysto, guryaha la kireysto, suuqyada ganacsiga, warshadaha, hoteellada, warshadda baabuurta ama goobaha gawaarida la dhigto;
- **"*Dul-xirka dambe*"** waxaa loola jeedaa qeyb baabuurka kamid ah kaasoo ka billowda khadka bartamaha candhada baabuurka ilaa geeska kale ama ilaa geeska ugu fog ee waaxyaha candhada ama haddii baabuurku leeyahay hal candho ilaa geeska dambe bartamaha candhadaas;
- "***Waddo***" waxaa loola jeedaa jid dan guud hadba sida micnihiisu yahay marka loo eego Sharciga Waddooyinka, waxaana ku jira waddo ama jid kasta, waddo-lugeed, waddo baabuur, rasto ama waddooyinkaay baabuurtu ku safri karto, dadkuna mari karo;
- "***Hal candho***" waxaa loola jeedaa candho keli ah oo ugu yaraan leh labo taayar oo aaryeysma ama gaas qaata;
- "***Candhada hoggaamisa***" waxaa loola jeedaacandhada marka lagu xiro lugaha u suurta-gelinaysa hoggaaminta baabuurka, balse kama mid ahan:
  b) Candha kasta oo uu leeyahay rimoor la jiido ama ay is-wataan rimoorka (kun-rimoor);
  t) Candhada dambe ama candhooyin ee baabuur-matoor leh oo kasta; iyo
  j) Candho kasta oo baabuur-matoor leh leeyahay oo la jiido kaddib marka la dhaqaajiyo qeybta hore ee baabuurka, marka laga riixo qeybta dambe ama laga dhaqaajiyo lugihiisa;
- "***Xamuul weyn***" waxaa loola jeeda xamuul si aan caadi ahayn u badan oo aan u qeybsameyn, kaasoo u baahan marin gaar ahaaneed, baabuur gaar ah iyo oggolaansho gaar ah, waxaana kamid ah wiishashka wax qaada ama qeybaha qalabyada waaweyn iyo dhismeyaasha waaweyn;
- "***Taayarrada kala weyn***" waxaa loola jeedaa mid kamid ah taayarrada waaweyn ee loogu talo-galay in lagu beddelo taayarrada waaweyn ee labo-labada candho ee baabuurka aariyeysa;
- "***Candhada isku-dhow***" waxaa loola jeedaa saddex candho oo isku-xiran oo isu jira 1.2 senti-mitir ilaa 2.5 senti-mitir hoosna isaga xiran si u suurto-gelinaysa qaadidda culeys walba oo la saaro;
- "***Miisaanka marnaashaha***" waxaa loola jeedaa miisaanka baabuurka marka uusan rarneyn, waxaana ku jira miisaanka jirka baabuurka iyo dhammaan qeybihiisa, midka ugu culus ayaa la xisaabinayaa marka lakala

Comment [b1]: Ereygan waxaa lagu qeexay bilowga Qodobkan, waxaana la siiyey micne ka duwan midka meeshaan lagu siiyey. Maxaa sababay? Wasaaradda Hawlaha Guud ha ka fakar qeexidaas kala duwan.

xulanayo jirka iyo qeybaha Baabuurta, taasoo lagama-maarmaan u ah ama si caadi ah la isticmaalo marka baabuur waddada la saarayo;

- "***Cagaf-cagaf"*** waxaa loola jeedaa gaari-matoor loo sameeyey ama laga dhigay in uu jiido rimoor balse isagu aan ahayn mid qaada badeecado ama rakaab;
- "***Rimoor"*** waxaa loola jeedaa baabuur loo sameeyey in uu baabuur-matoor leh jiido, balse kuma jiraan qeybaha dhinaca looga xiro mootooyinka;
- "***Baabuur"*** waxaa lagu qeexayaa sida sharciga waddo-marista Soomaaliya u qeexay;
- "***Qalabka miisaanka***" waxaa loola jeedaa Qalab kasta ee loo adeegsado miisaamidda baabuurta matoorrada, waxaana kamid ah xarunta joogtada ah ee marinka miisaanka, qalabka miisaamidda ee dhaqdhaqaaqa ama qalabka miisaama qeybaha Baabuurta;

Qodobka 3aad
Ujeeddada Sharciga

Sharcigani wuxuu nidaaminayaa "**Xamuulka iyo Xadeynta Cabbirka Baabuurta**" wuxuuna xaddidayaa Rakibaad Qalabka, Waajibinta Miisaanka Baabuurta, Cabirraadda Miisaanka, Shuruudaha Qaadidda Xamuulka xad-dhaafka ah iyo Rar-ka-dejinta, Bixinta Ganaaxyada, Ciqaabta Xamuulka Xad-dhaafka ah, Cafinta Miisaanka Xad-dhaafka ah,Hab-raaca Xamuulka Xad-dhaafka ah, Xadeynta Cabirka Baabuurta, Xadka Miisaanka Baabuurta, Qaadidda Ganaaxyada, Kharashka Dib-u-hagaajinta, Cabbirka iyo Culeyska ugu badan ee baabuurta; sidoo kale sharcigani wuxuu ka-hortegayaa Dembiyada Xamuulka Xad-dhaafka ah ee ka hor-imanaya sharcigan**.**

Qodobka 4aad
Wajibaadka Wasiirka

Waajibaadka Wasiirka waa:

b) In uu dejiyo siyaasadda iyo hababka sharciyeynta isagoo u maraya hannaan wada-tashi ee arrimaha xamuulka gawaarida iyo xadka cabbirka baabuurta Soomaaliya;
t) In uu magacaabo ama u xilsaaro saraakiil qabata awoodaha ama fuliya waajibaadka sharcigan;
j) In uu xilli kasta kor-joogteyn iyo qiimeyn ku sameeyo in la fulinayo qodobbada sharcigan;
x) In uu hubiyo wada-shaqeynta iyo waafaqsanaanta shuruudaha heer gobol ee baabuurta xamuulka iyo xadka cabbirka baabuurta;
k) In uu fududeeyo dib-u-eegista Sharcigan iyo siyaasadda baabuurta xamuulka iyo xadka cabbirka baabuurta si loola mideeyo hal-beegyada farsamo ee heer gobol;
d- In uu qabto kulamo laga soo qeyb-gelinayo dadweyne marka la dejinayo ama dib-u-eegis lagu sameynayo Sharcigan ama siyaasadiisa;
r. In uu hubiyo in gaadiidleydu u hoggaansamaan qodobbada sharcigan iyo xeer-nidaamiyaasha; iyo
s. In uu maamulo oo ilaaliyo hirgelinta xadka cabbirka baabuurta xamuulka qaada.

Qodobka 5aad
Magacaabidda Saraakiisha Idman

1. Wasiirku, isagoo ku daabacaya faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuu magacaabi karaa:
   b) Xubin hawl-wadeennada Wasaaradda kamid ah: hawl-wadeen u shaqeeya wakaalad/hay'ad kasta ee dawladeed oo ka shaqeysa arrimaha sharcigan lagu xusay; iyo
   t) Sarkaalka idman, waxaa lagu magacaabayaa shahaado leh qaab-qoraal wasiirku jideeyey.

2. Wasiirku, isagoo la tashanaya wasaarad kasta oo ay khuseyso, wuxuu jideyn karaa Shuruudaha Magacaabidda iyo hab-dhaqanka xirfadlenimo ee saraakiisha idman.

3. Wasiirku wuxuu jideynayaa sababaha baabi'inta Magacaabidda iyo hab-raaca xil-ka-qaadista sarkaalka idman markuu ku xad-gudbo qodobbada sharcigan.

Qodobka 6aad
Awoodaha Saraakiisha Idman

Awood ahaan, Sarkaalka idman wuxuu:
b) Ka dalban karaa wadaha in uu joojiyo baabuurka si loo miisaamo loona baaro;
t) Geli karaa baabuurka;
j) Baari karaa:
   i. Xamuul kasta oo baabuurka saaran ama ku jira; iyo
   ii. Xog kasta oo la xiriirta xamuul kasta uu sido baabuurku ama ku jira;
x) Miisaami karaa xamuul kasta ee uu baabuurku sido ama ku jira;
k) Miisaami karaa inta culeys ay sidaan candho kasta ama kooxda candhooyin ee baabuurku leeyahay;
d- Baari karaa xog kasta oo la xiriirta ama xamuulka lasoo saaray ama looga baahan yahay sharciga ee gaadiidka;
r. Baari karaa xog ama shay kasta ee la xiriirta baabuurka, ku-shaqeyntiisa ama xamuul kasta uu sido ama ku jira;
s. Wareysan karaa qof kasta ee maamula ama ku shaqeeya baabuurka baaritaanku ku socdo; iyo
sh) Ka gudan karaa waajibaadkiisa baabuur kasta uu ka shakiyo ama fatashi karaa baabuurka ama xamuulka uu sido ama ku dhex jira.

Qodobka 7aad
U-wakiilasho Shaqooyinka Wasaaradda

1. Wasaaraddu, iyadoo la dhawrayso qodobbada heshiishyada wakaalashada waxay u wakiilan kartaa mid kasta oo kamid ah shaqooyinka sharcigani dhigayo, iyadoo magacaabeysa:
   b) Hay'ad kasta ee Dawladeed; ama
   t) Shakhsi kasta ee gaar ah, inuu u noqdo wakiil.

2. Wasiirka ayaa mas'uulka ka ah maaliyadda wuxuuna u wakiilan karaa qaadidda kharashaadka ganaaxa xamuulka/culeyska xad-dhaafka ah ama aan caadiga ahayn.

3. Wasiirku wuxuu wakiilan karaa:
   b) Ku-shaqeynta iyo dayactirka nidaamka xogta loo adeegsado maamulidda baabuurta xamuulka qaada;
   t) Keenidda, ku-shaqeynta iyo dayactirka Aaladaha miisaanka;
   j) Qabashada baaritaannada sanadlaha ah iyo kormeereyaal gaar ahaaneed; iyo
   x) Gudashada waajibaadka dhaqan-gelinta sharciga iyo u hoggaansanaantiisa.
   k) Haddii ay suurto-geli weydo in la fuliyo shaqada si ay faa'iido u-hesho Dawladda, ma jirto sharcigan gudihiisa wax ka mamnuucaya in Dawladdu kharash ku bixiso wakiilashada ama suurto-gelinta shaqada.

Qodobka 8aad
Heshiishyada wakaaladda

1. Wasiirka maaliyadda wuxuu geli karaa heshiisyo wakaalad si uu ugu wakiisho ama u suurto-geliyo qabashada shaqo in ay qabtaan dadka qodobka 7aad lagu xusay.

2. Wakiilashada ku xusan faqradda (1) ee Qodobkan, waxay bixin kartaa:
   b) Qaddarka khidmadda la dhiibayo ee xisaabta Ganaaxyada iyo ganaaxyada Wasaaradda u xilsaaran maaliyadda;
   t) Hababka la raacayo marka la qaadayo ama la dhiibayo ganaaxyada, xisaabta ganaaxyada iyo bixinta ganaaxyada;
   j) Dejinta ujeeddooyinka/bar-tilmaameedyada waxqabad;
   x) Bixinta faa'iidooyinka iyo abaal-marinnada dheeriga ah ee la bixiyo marka la qabto waxqabad dheeraad ah;
   k) Dhimista waxbixinta marka gaabis yimaad;
   d- Baaritaannada joogtada ah iyo kuwa kediska ah; iyo
   r. Arrin kasta ee lagama-maarmaan noqota si loo gaaro ujeeddooyinka sharcigan.

Qodobka 9aad
Mag-dhawga Wakiillada

1. Haddii heshiis lagu gaaro in loo wakiisho cid kale in ay shaqada qabato ama keento, Wasaaradda maaliyadda, hadba sida xaalku noqdo heshiiskaas, iyadoo aan laga hor- imaaneyn qodobka hore ee 8aad, waa in uu siiyaa wakiillka mag-dhaw ku filan oo cadaalad ah sida mabaadi'da ganacsigu qabo.
2. Heshiiska lagu xusay faqradda (1) ee qodobkan, marka laga hadlayo wakiilashada qaadidda ganaaxyada, waa in la bixiyo haynta qeybta maamulka ee khidmadda mag-dhawga wakiilka.

QEYBTA II
MIISAANKA UGU BADAN EE BAABUURTA

Qodobka 10aad
Rakibaadda Aaladda Miisaanka

1. Wasiirka ayaa ogeysiin ku daabacaya Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, isagoo ku tilmaamaya nooca Aaladda Miisaanka iyo goobta lagu rakibayo.

2. Wasiirku wuxuu dib-u-eegi karaa tirada Aaladaha la rakibayo isagoo ku daabacaya Faafinta Rasmiga ah ee Dawaladda.

3. Wasaaraddu waxay suurto-gelinaysaa rakibaadda Aalad miisaamid oo adag (aan nuuxsi lahayn) ama qalab kasta ee baaritaan ee lagu rakibo waddooyinka, wasaaraddu waxay kaloo dhinacyada waddooyinka ka taagaysaa calaamado muujinaya baabuurta qaar oo loo baahan yahay in la miisaamo.

Qodobka 11aad
Waajibnimada Miisaamidda Baabuurta

1. Qof kasta ee ah milkiile baabuur ganacsi ama wade ka ah waa in uu keenaa baabuurkaas goobaha Aaladaha miisaanka ama qalabka kale ee wasiirku tilmaamo sida Qodobka 10aad ee sharcigan lagu soo xusay, kuwaas oo ku rakiban waddada uu marayo baaburkaasi si loo miisaamo.

2. Qof kasta ee u hoggaansami waaya arrimaha ku xusan faqrada hore ee Qodobkan, wasiirku wuxuu ku soo rogi karaa Qaraar maamul ee sharcigani oggol yahay, kuwaas oo dheeri ka ah ganaaxyada sharcigan lagu jideeyey.

Qodobka 12aad
Wadaha Baabuurku iyo Awaamirta Sarkaalka Idman

1. Wadaha baabuurku waa inuu habsami u qaataa awaamirta Sarkaalka idman:
   b) Marka loo muujiyo calaamad ama uu ka dalbado sarkaalka loo idmay in uu joogsado; ama
   j) Haddii Sarkaalka Idman ka codsado in uu soo-saaro shahaadada ballanta, isla markiiba baabuurka waa in lageeyaa Aaladda miisaanka sida uu amray Sarkaalka Idman.

Qodobka 13aad
Habka Miisaamidda

Sarkaalka idman wuxuu:
b) Ka dalban karaa wadaha in uu baabuurka joojiyo;
t) Geli karaa gudaha baabuurka;
j) Baari karaa:
   i. Xamuul kasta ee saaran baabuurka ama ku dhex jira; ama
   ii. Wuxuu weydiin karaa Macluumaad kasta ee la xiriirta xamuulka baabuurka saaran ama ku dhex jira;
x) Miisaami karaa baabuurka iyo xamuulka uu sido ama ku dhex jira;

Comment [b2]: Qodobkaan iyo Qodobka 6aad ee Sharcigan waa isku micno dhaw yihiin. Wasaaradda Hawlaha Guud ha ku laabato si taxaddar lehna ha isu waafajiso labaas Qodob ha kale waxay keeni karaan soo laalaabasho sharci.

k) Miisaami karaa inta ay tahay culeyska ay qaadi karaan candhada ama candhooyinka baabuurka;
d- Baari karaa xog kasta ee la xiriirta, lagu soo saaray ama lagu waajibiyey Sharciga gaadiidka Dalka;
r. Baari karaa shay kasta ee la xiriira baabuurka, ku shaqeyntiisa ama xamuul kasta ee uu sido ama ku dhex jira; ama
s. Wuxuu diyaarin karaa qab-soomidda tijaabooyin ama baaritaan lagu sameeyo baabuurka ama xamuulka uu sido ama ku dhex jira.

Qodobka 14aad
Cabirrada Miisaanka

1. Sarkaalka idman waa in uu hubiyaa in mar kasta cabbirku taagan yahay eber (0) inta aan miisaamiddu billaaban.

2. Marka la isticmaalayo Aaladaha miisaanka hal candho ama culeyska guud ee baabuurka wuxuu noqonayaa isu-geynta culeyska candhooyinka kala duwan.

3. Sarkaalka idman waa in uu isticmaalaa cabirrada sharciga Soomaaliya oggol yahay.

4. Sarkaalka idman waa in uu wadaha u soo saaraa warbixinta Aaladda miisaanka, waduhuna waa in uu ku oggolaadaa warbixintaas isagoo dhinac ka saxiixaya, taasoo caddeyn u ah in uu fahmay nuxurka warbixintu ka kooban tahay ee ah xogta cabirrada baabuurka ee u dhigan qaab aqrin muujinaysa ee cabirrada.

5. Marka xamuulku waafaqsan yahay cabirrada culeyska xamuulka iyo culeyska guud ee baabuurka ee sharciga oggol yahay, warbixinta Aaladda miisaanka waxaa loo qaadanayaa in ay tahay oggolaansho waafaqsan sida sharcigani qabo, wadahuna waa in uu wataa inta uu ku jiro safarkaas.

6. Haddii ay jirto sabab keenaysa in la rumeysto, in baabuurka inta uusan marin barta baarista (kontaroolka) ee xigta, in dib loo raray ama rarkiisa wax laga beddelay si kastaba ha ahaatee, dib ayaa loo miisaami karaa baabuurka, waxaana lasoo saarayaa warbixin cusub ee Aaladda miisaamidda.

Qodobka 15aad
Soo-saaridda Oggolaansho Gaar ah

1. Wasiirku wuxuu soo saari karaa oggolaansho gaar ah, marka uu soo codsado qof kasta, oo loogu oggolaanayo daabulid xamuul aan caadi ahayn, haddii shuruudaha soo socda la helo:
   b) Soo xaadirin baabuurka iyo xamuulka uu sido si loo miisaamo;
   t) Soo xaadirin baabuurta la socota baabuurka;
   j) Isticmaalid nalalka iyo qalabka digniinta;
   x) Keenid Jadwalka waqtiyada safarka baabuurka; iyo

k) Arrin kasta ee kale oo uu wasiirku si meel-mar ah u arko in ay lagama-maarmaan u tahay qaadidda xamuulka, badbaadinta waddooyinka iyo deegaanka.

Qodobka 16aad
Xamuulka Aan Caadiga Ahayn

1. Baabuur-matoorka ama rimoorka sida xamuul aan caadi ahayn waa in uusan isticmaalin waddada ilaa milkiilihiisa diiwaan-gashani:
   b) Uu bixinayo khidmada oggolaanshaha xamuulka aan caadiga ahayn sida uu jideeyey wasiirku; iyo
   t) Loo soo-saaro oggolaansho gaar ah si waafaqsan sharcigan.

2. Marka xamuulka aan caadiga ahayni leeyahay ballaar dhaafsan xadkii sharcigu jideeyey, milkiilaha diiwaan-gashan ee baabuurka waa in uu keenaa baabuur lasocda oo kharashkiisa ah, wasiirkuna waa in uu u soo-saaraa oggolaansho gaar ah oo sharciga waafaqsan, kaddib marka uu bixiyo khidmada loo asteeyey.

3. Marka baabuurku sido xamuul aan caadi ahayn oo sababi kara in waddada dhibaato ka soo gaarto, milkiilaha diiwaan-gashan ee baabuurku waa in uu raacaa Shuruudaha lagu caddeeyey oggolaashaha wasiirka si looga hor-tago dhibaato soo gaarta waddada ama qeyb kamid ama buundo (bridge).

4. Haddii, inta lagu jiro daabulidda xamuulka aan caadiga ahayn, dhaawac muuqda loo geysto buundo (bridge), qaabka waddada ama agabka waddada, milkiilaha diiwaan-gashan ee baabuurku waa in uu xambaaraa ganaax kasta ee ku waajiba candho kasta ama culeyska guud ee baabuurka si waafaqsan sharcigan.

Qodobka 17aad
Shuruudaha Qaadidda Xamuulka aan Caadiga ahayn ama Xad-dhaafka ah

1. Qofna waa in uusan la dul-marin waddooyinka guud xamuulka aan caadi ahayn ama xad-dhaaf ah ilaa:
   b) Uu bixiyo khidmada xamuulka aan caadiga ahayn ama xad-dhaafka ah oo la siinayo Wasaaradda, sarkaalka idman ama wakiilka Wasaaradda ee qaabilsan; iyo
   t) Inta qofkaas uu guddigu siinayo fasax gaar ah, oo hadba sida ay suurto-gal ku tahay, oggolaansho in uu ku wado waddada guud baabuur xamuulkiisu xad-dhaaf yahay, sida ku cad wareegtooyinka ay khuseeyso iyo haddii aan qofkaas lagu diidin si waafaqsan Sharcigan.

2. Qofna uma qalmo in uu qaado xamuul xad-dhaaf ah, haddii:
   b) Qaadidda xamuulka xad-dhaafka ah uu ka badan yahay qaddarka awoodda baabuurka ee loogu talo-galay in uu qaado; iyo
   t) Qofkaasi:

i. Oo deyn Wasaaradda ku leedahay oo ah lacagaha ay tahay in la bixiyo si waafaqsan sharcigan; iyo
ii. Laga joojiyey daabulidda xamuulka xad-dhaafka ah si waafaqsan sharcigan.

Qodobka 18aad
Shuruudaha dheeriga ah ee Qaadidda Xamuulka Xad-dhaafka ah

1. Wasiirku wuxuu ku soo rogi karaa shuruudo dheeri ah, qof kasta ee doonaya in uu qaado xamuul aan caadi ahayn ama xad-dhaaf ah, shuruudahaas waxaa kamid ah:
   b) Soo xaadirin baabuurka iyo xamuulkiisa si loo miisaamo;
   t) Keenid gawaarida la socota (kab ah);
   j) Isticmaalka nalalka iyo agabka digniinta;
   x) Xilliyada safarka; ama
   k) Arrin kasta ee kale oo wasiirku si meel-mar ah u arko in ay lagama-maarmaan u tahay qaadidda xamuulka, badbaadinta waddooyinka iyo deegaanka.

2. Wasiirku wuxuu jideyn karaa ganaaxyada la xiriira mid kast oo kamid ah shuruudaha dheeriga ah ee qaadidda xamuulka xad-dhaafka ah.

Qodobka 19aad
Rar-ka-dejin

1. Haddii baabuurta aad loo raro ee xamuulka saaran loo aqoonsado in uu yahay xad- dhaaf, waa in aan rarka looga dejin xarunta Aaladda miisaanka ilaa la qaado tallaabooyinka sharcigu qabo ee digtoonaanta gaarka ah, Milkiilaha diiwaan-gashan ee baabuurka waa in uu bixiyaa khidmada mid kasta oo candhooyinka baabuurka ee culeyska xad-dhaafka ah la saaray ama inta dheeriga ka ah culeyska guud ee baabuurka.

2. Haddii meesha uu u socdo baabuurku ka fog tahay meeshii uu ka yimid marka loo eego barta rarka looga dejinayo si xadka sharciga ah loogu celiyo, baabuurku wuu sii socon karaa kaddib marka dib loogu qeybiyo xamuulka.

Qodobka 20aad
Dembiyada Xamuulka Xad-dhaafka Ah

1. Qof milkiilaha ah ama wade baabuur-matoor ama mas'uul ka ah baabuur-matoor ee diida in uu raaco tilmaamaha ay muujinayaan calaamadaha waddada ee la sameeyey, iyadoo la raacayo qodobka 19aad ee sharcigan ama marka Sarkaalka idman ka dalbo in uu baabuurka-matoorka keeno Aaladda miisaanka si loo miisaamo balse keeni waaya baabuurka-matoorka Aaladda miisaanka si loo miisaamo ama loogu tijaabiyo qalab, wuxuu gelayaa dembi xamuul xad-dhaaf ah, isagoo loo heysta dembigaas, wuxuu mutaysanayaa ganaax aan ka badnayn lacag Shillin Soomaali u dhiganta "US$200" (labo boqol) oo dollarka Maraykanka ah ama xarig muddo aan ka badnayn 12 (labo iyo toban) bilood, ama ganaax iyo xarig labadaba.

2. Qofka haddii uusan oggolaansho gaar ah ka haysan wasiirka, isla markaana ku kaxeeya waddo guud ama u isticmaalo baabuur-matoor uu miisaankiisa guud ka badan yahay cabbirka loo xadeeyey baabuurta noociisa ah, marka laga reebo:
   b) Haddii culeyska guud ee baabuurku u qeybsan yahay candhooyinka sida lagu qeexay Jadwalka Sharcigan; ama
   t) Cabbirka guud ee baabuur-matoorka iyo rimoorka oo uu ku jiro culeyska saaran uusan dhaafsanayn xadka joogga Sharcigu oggolyahay.
      - Wuxuu gelayaa dembi, wuxuuna muteysanayaa ciqaab ganaax ah oo aan ka badnayn lacag Shillin Soomaali u dhiganta "US$2,000" (labo Kun) oo dollar Maraykanka ah ama muddo xarig ah oo aan ka badnayn 12 (labo iyo toban) bilood ama in ganaaxa iyo xarigga laysugu daro.

3. Qofkii:
   b) Ku kaxeeya ama ku isticmaala ama oggolaada in lagu wado ama lagu isticmaalo baabuur-matoor kasta ama rimoor leh si kasoo hor-jeeda mid kasta oo kamid ah qodobbada sharcigan;
   t) Ku guul-darreysta in uu raaco shuruudaha oggolaanshaha gaarka ah ee wasiirku soo-saaro; ama
   t) Qof kasta oo ujeedkiisu tahay in uu dhagro ama khiyaamo, wax-ka-beddelo, wax-ku-daro, xumeeyo, been-abuuro ama si kastaba faro-gelin ku yeesha oggolaanshaha,
      - Wuxuu gelayaa dembi, wuxuuna muteysanayaa ciqaab ganaax ah oo aan ka badnayn lacag Shillin Soomaali u dhiganta "US$2,000" (labo Kun) oo dollar Maraykanka ah ama muddo xarig ah oo aan ka badnayn 12 (labo iyo toban) bilood ama in ganaaxa iyo xarigga laysugu daro.

Qodobka 21aad
Ogeysiinta Xamuulka Xad-dhaafka Ah iyo Bixinta Ganaaxyada

1. Iyadoo la raacayo qodobbada sharcigan, ogeysiinta warbixinta Aaladda miisaanka ayaa sal u ah ganaaxyada, haddii lagu helo in xamuul xad-dhaaf ahi jiro sida ku qeexan Sharcigan.

2. Marka la soo-saaro foomka warbixinta Aaladda miisaanka, waxay noqonaysaa waajib saaran wadaha baabuurka in uu ogeysiiyo milkiilaha diiwaan-gashan, dembiga xamuulka xad-dhaafka ah ee la galay, milkiiluhuna waa in uu bixiyaa ganaaxa.

3. Marka milkiilaha diiwaan-gashan ee baabuur-matoor jiidaya rimoor uu rarka ka badiyo baabuurka, waa in uu xambaaraa dembiga rarka xad-dhaafka ah, waana in uu bixiyaa ganaaxa lagu mutaystay rarka xad-dhaafka ah.

4. Si loo sugo bixinta ganaaxyada, baabuurka sida xamuulka xad-dhaafka ah waa in la hayaa iyadoo 3 (saddex) maalin ee ugu horreysa aan waxba laga qaadin, haseyeeshee, maalin kasta ee dheeri ah ee xigta saddexdaas maalin, waxaa baabuurka la xayiro ku waajibaya kharashka la jideyn doono, waana

xiyirnaanayaa baabuurku ilaa la keeno caddeyn in la bixiyey ganaaxii xamuulka xad-dhaafka ah.

5. Iyadoo la raacayo faqradaha qodobkan, baabuurta la qabtay waa in lagu hayaa mas'uuliyadda milkiilaha, bixinta ganaaxyada la sheegayna waxaa lagu bixin karaa lacag caddaan ah (cash money) ama jeeg banki oo aan wax laga beddeli karin oo lacag Doolarka Mareykanka ah ama Shillin Soomaali u dhigma.

Qodobka 22aad
Hab-raaca Xakameynta Xamuulka Xad-dhaafka Ah

1. Marka baabuur loo raro si xad-dhaaf ah ama si khilaafsan qodobbada sharcigan, sarkaalka idman waa in uu qaado tallaabooyinka xakameynta culeyska xad-dhaafka ah, isagoo marwalba dhaqan-gelinaya Sharcigan.

2. Iyadoo la raacayo faqradda (1) ee qodobkan, wadaha waa in uu raacaa awaamirta uu farayo sarkaalka idmani si loogu hoggaansamo hab-raacyada nabadgelyada waddooyinka iyo xakameynta xamuulka xad-dhaafka ah.

3. U-hoggaansanaan-la'aanta awaamirta sarkaalka idman ama booliska waa xad-gudub lagu muteysan karo in la xayiro baabuurka iyo xamuulkiisa, iyadoo kharashka xayiraadana uu bixinayo milkiilaha diiwaan-gashan ee baabuurka, isagoona xambaaraya wixii khatar iyo waxyeello ka dhasha halkaas.

4. Haddii ganaaxa lagu xusay qodobkan aan lagu bixin 90 (sagaashan) maalmood gudahood laga billaabo maalinta la jaray, wasiirku wuxuu soo-saarayaa naado beecin xaraash ah ee baabuurka iyo rarkiisa.

5. Iyadoo la raacayo faqradaha (4) ee qodobkan, inta aan laga takhalusin rarka, Wasiirku waa inuu ogeysiis ku daabacaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyo ugu yaraan 2 (labo) wargeys oo heer qaran ah muddo dhan 14 (afar iyo toban) maalmood gudahood, kaddib marka baabuur-matoorka ama rimoorka la xayiray, iyadoo milkiilaha lagu wargelinayo in uu raadsado hantidiisa, haddii uu sidaas sameyn waayana la xaraashi doono.

6. Habka beecinta/iibinta hantidan oo kale, waxaa la socda kharashaadka lagu galo beecinta waxayna isugu jiri karaan kharashka xayeysiinta iyo qaadidda baabuurka ama rimoorka ee la galo inta habku socdo, haddii ay noqoto in milkiiluhu kharashka bixin waayo ama uu ku guul-darreysto in uu soo raadsado hantidiisa muddo dhan 6 (lix) bilood gudahood inta beecu socdo, faa'iidada waxaa la dhigayaa Wasaaradda.

7. Sababa amni awgood, wasaaraddu waa in ay war-gelisaa xarunta booliska ee ugu dhow 24 (afar iyo labaatan) saac gudahood, macluumaadka khuseeya baabuurka la xayiray ee yaal xarunta miisaanka.

Qodobka 23aad
Mas'uuliyadda Xaddidaadda Ganaaxa Xamuulka Xad-dhaafka Ah

1. Marka baabuur lagu helo in uu garab-maray ama uu isku-dayo in uu ka dhuunto xarunta Aaladda miisaanka, ha saarnaado culeys xad-dhaaf ah ama yuusan saarnaane, milkiilaha diiwaan-gashan waxaa lagu amrayaa in uu bixiyo ganaaxa garab-marka ama ka-dhuumashada oo ah ilaa lacag Shillin Soomaali u dhiganata "US$1,000" (kun) oo doollarka Maraykanka ah

2. Iyadoo la fulinayo qodobbada sharcigan, haddii lagu helo baabuurka in uu u raran yahay si xad-dhaaf ah, isagoo bixiyeyna ganaaxa xamuulka xad-dhaafka ah iyo kharashaadka hab-raacyada sharcigani tilmaamayo, waxaa milkiilaha waajib ku ah in uu bixiyo ganaaxa ka-dhuumashada miisaanka oo dheeri ka ah kharashaadka kale.

3. Haddii lagu helo in baabuurku sido xamuul ka badan xadkii sharcigu jideeyey, milkiilaha baabuurka ama qofka ku shaqeynaya wuxuu bixinayaa ganaaxa loo jideeyey rarka xad–dhaafka ah, iyadoo la siinayo Guddiga ama wakiilkooda magacaaban.

Comment [b3]: Ereygaan Guddi waxaa lagu sheegay dhawr meelood oo sharci ka mid ah, lagumana xusin Sharciga dhexdiisa waajibaadka, qeexitaanka iyo meesha xubnihiisu ka imaanayaa Guddiga. Marka ma qoraal khaldan baa mise waa hilmaanteen in la faahfaahiyo Guddigaas. Wasaaradda Hawlaha Guud arrintaas si qoto-dhe ha uga fakarto.

Qodobka 24aad
Ciqaabta Maamul ee Xamuulka Xad-Dhaafka Ah

b) Iyadoo la raacayo qodobbada sharcigan, wuxuu Wasiirku soo-saarayaa ganaaxyo ama ciqaab cusub oo dheeri ah oo ku aaddan xamuulka xad-dhaafka ah, kuna waajibinayo qofkii ku xad-gudba in si ku-meel-gaar ah looga mamnuuco isticmaalka waddo gooni ah ama si guud.

t) Inuu kusoo rogo xadka ugu sarreeya ee ganaaxa laga qaado xamuulka xad-dhaafka ah ee markasta qaada xamuulka xad-dhaafka ah ee ka badan xadka culeys ee sharcigu oggol yahay xilli go'an ama aan go'nayn.

j) Kala noqosho shatiga/oggolaashaha/rukhsadda uu ku shaqeeyo.

Qodobka 25aad
Ka-cafin Miisaamid Duruufo Gaar Ah Awgood

1. Wasiirku wuxuu ka cafin karaa baabuur in la miisaamo, sababahan gaarka ah ee soo socda:
   b) Marka gadiidku la xiriiro arrimaha Amniga Qaranka; ama
   t) Marka baabuur-matoorka loo adeegsado daabulidda gargaarka ama xaalad degdeg ah ee dib-u-dhis kaabayaal ku waxyeelloobay musiibo Qaran.

2. Wasiirku wuxuu u soo-saarayaa milkiilaha oggolaansho gaar ah inta uusan billaabin hawsha, isagoo ku sheegaya duruufaha keenay arrinta ee lagu xusay faqrada (1) ee qodobkan.

Qodobka 26aad
Rafcaan

1. Qofka lagu dulmiyo go'aanka sarkaalka idman ee ah in loo diido warbixinta Aaladda miisaanka ama oggolaansho kasta ee ay ahayd in lasiiyo ee sharcigani

xaq u siinayo, wuxuu go'aankaas rafcaan uga qaadan karaa Wasiirka, muddo 60 (lixdan) maalmood gudahood ah kaddib go'aanka Sarkaalka idman.

2. Haddii qofku ku qanci-waayo go'aanka Wasiirka ee ku xusan faqrada (1) ee qodobkan, wuxuu rafcaan uga qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Dalka, muddo 30 (soddon) maalmood gudahood ah kaddib go'aanka Wasiirka.

QEYBTA III
XADKA CABBIRKA DHINACYADA BAABUURTA IYO CULEYSKA CANDHADA

Qodobka 27aad
Xadka Cabbirka Dhinacyada Baabuurta

1. Ballaarka guud ee baabuur kasta iyo xamuulkiisu waa in aysan ka badan 2.50 mitir.
2. Joogga guud ee baabuur kasta iyo xamuulkiisu waa in aysan ka badan 4.50 mitir.
3. Dherarka guud oo uu ku jiro biraha is-jiidku waa in aysan dhaafin:
   b) Baabuurta 1 (hal) candhooleyaasha ah, 6 mitir;
   t) Baabuurta 2 (labo) candhoolayaasha ah, 10 mitir;
   j) Baabuurta 3 (saddex) candhoolayaasha ah, 11 mitir; iyo
   x) Baabuurta basaska ah ee 2 (labo) candhoolayaasha ah, 11 mitir.

4. Dherarka guud rimoorku waa in uusan dhaafin:
   b) 1 (hal) candhooleyaasha, 6 mitir;
   t) 2 (Labo) candhoolayaasha, 7.50 mitir;
   j) 3 (Saddex) candhoolaha iyo ka badan, 8 mitir; iyo
   x) Dherarka guud ee baabuurta is-jiida waa in uusan dhaafin 18 mitir;

5. Dherarka guud ee tareellayaashu waa in aysan ka badan 14 mitir.

6. Koonayaasha iyo bartamaha digsiyadu waa in aysan dhaafin dhinacyada baabuurka.

7. Arrimaha qodobkani sheegayo ma khuseeyaan qalabka loo adeegsado dhismaha waddooyinka.

8. Qofkii ku xad-guba faqradaha qodobkan wuxuu muteysanayaa ciqaab:
   b) Marka uu yahay ku xad-gudbaha kowaad, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax aan ka badnayn lacag Shillin Soomaali u dhiganta "US$200-300" (labo – saddex) boqol oo doolarka Maraykanka ah ama xabsi muddo aan ka badnayn 2 (labo) sano, ama ganaax iyo xarig labadaba; iyo
   t) Marka xad-gudubkiisu yahay mid soo noqnoqda, wuxuu mutaysanayaa xabsi heerka ugu sarreeya ee ciqaabta qodobbada hore lagu soo xusay.

Comment [b4]: Ganaaxa Lacagta Qodobkan la sheegay iyo Xabsiga 2 (labada) sano ah isuma dhigmaan. Wasaardda Hawlaha Guud ha u fiiriso meeshaan si qoto-dheer, hana la is-waafajiyo.

9. Iyadoo dheeri ka ah ciqaabta faqrada (8) ee qodobkan, Dawlad-goboleedka ay khuseyso mas'uuliyadda, wuxuu soo rogi karaa ciqaab maamul oo ka dhan ah qofkaas xad-gudbay, waxayna isugu jiri kartaa:
   b) Ka-joojin ku-meel-gaar ah ee isticmaalka waddo gaar ah; ama
   t) Kala-laabasho xilli xaddidan ee Shatiga shaqo-qabashada.

Qodobka 28aad
Xadka Miisaanka Baabuurta

1. Qofka leh ama ku shaqeeya baabuur-matoor waa in uu keenaa baabuurkaas si loo miisaamo meelkasta ee ay ka jirto Aaladda miisaanka ee dariiqa uu ku safrayo baabuurkaasi.

2. Marka waduhu u hoggaansami-waayo faqradda (1) ee qodobkan, Dawlad-goboleedku waxay ku soo rogayaan wadahaas ciqaabaha maamul ee qodobkan ku xusan.

3. Culeyska miisaanka guud ee baabuur-matoorka ama tareellaha oo ka kooban culeyska baabuurka xaaladaha uu socdo iyo xamuulkiisa waa in aysan dhaafin:
   b) Hadduu yahay mid 1 (hal) candhoole ah, 10 tan;
   t) Hadduu yahay mid 2 (labo) candhoole ah, 14 tan;
   j) Hadduu yahay mid 3 (saddex) candhoole ah, 18 tan;
   x) Hadduu yahay mid 4(afar) candhoole ama ka badan, 22 tan; ama
   k) Basaska loo isticmaalo adeegyada dadweynaha ee tuulooyinka, culeyska guud ee marka uu buuxo waa in uusan ka badan:
      i. Hadduu yahay 1(hal) candhoole, 15 tan; iyo
      ii. Hadduu yahay 3 (saddex) candhoole, 19 tan.

4. Culeyska guud iyo rarkoo buuxa ee tareelleyaasha ama rimoor waa in aysan dhaafin:
   b) Haduu yahay 3 (saddex) candhoole, 18 tan;
   t) Hadduu yahay 4 (afar) candhoole, 28 tan; iyo
   j) Hadduu yahay 5 (Shan) candhoole iyo wixii ka badan, 32 tan.

5. Culeyska ugu badan ee loo oggol yahay baabuur-matoor rimoor leh:
   b) Candhada ugu culus waa in uusan ka badan 10 tan; iyo
   t) Culeyska 2 (labada) candho oo isku-xiran isuna jira wax ka yar 2 (labo) mitir, waa in uusan ka badan 16 tan.

6. Cadaadiska taayarka lugta baabuurka waa in uusan dhaafin 7 (toddobo) kilo garaam halkii sinti mitir oo 2 (labo) jibaaranba.

7. Qofkii ku xad-gudba qeybaha qodobkan wuxuu gelayaa dembi, wuxuuna muteysanayaa ganaax aan ka badnayn lacag Shillin Soomaali u dhiganta "US$200-300" (labo-saddex) boqol oo doolarka Maraykanka ah ama xabsi muddadiisu aysan ka badnayn 2 (labo) sano, ama xabsiga iyo gaanaxa labadaba.

Comment [b5]: Sida aan kor ku sheegnay iska waafaqsana hala iswaafajiyo ganaaxa iyo xabsiga meeshan ku xusan.

Qodobka 29aad
Ballaca iyo Culeyska Ugu Badan Ee Baabuurta

1. Ballaca iyo culeyska ugu badan ee gawaarida ee la oggol yahay waa sida lagu qeexay qeybta (A) ee jadwalka sharcigan.

2. Iyadoo aan laga hor-imaaneyn faqrada (1) ee qodobkan, milkiilaha baabuur-matoor ganacsi ama wadehiisa waa in aysan qaadin rar/xamuul aan caadi ahayn ama xad-dhaaf ah waddooyinka guud korkooda ilaa ay bixiyaan ganaaxa xamuulka aan caadiga ahayn ama xad-dhaafka ah oo ay siinayaan Dawlad-goboleedka ay khuseyso.

3. Dawlad-goboleedka ay khuseyso waxay ku soo rogi kartaa shuruudo dheeri ah qof kasta ee doonaya in uu qaado xamuul aan caadi ahayn ama xad-dhaaf ah, shuruudahaas oo isugu jiri kara:
   b) Soo xaadirinta baabuurka iyo xamuulka uu sido si loo miisaamo;
   t) Keenid baabuurta lasocota;
   j) Isticmaalka nalalka iyo agabka digniinta;
   x) Xilliyada safarka; ama
   k) Arrin kasta ee kale, ee fekradda Dawlad-goboleed ahaan u arkaan, in ay u tahay lagama-maarmaan xamuulkaas, dhawridda waddooyinka iyo deegaanka.

Qodobka 30aad
Mamnuucid Rarka iyo Dhinacyada Baabuurta ee Xadka Sharciga Dhaafsan

Iyadoo la raacayo qodobbada sharcigan, qofna waa in uusan kaxayn/wadin ama uusan dhaqaajin, isagoo aan fasax haysan, waddo guud korkeed baabuur culeys ama xamuulka saaran dhaafsan yahay xadka culeyska ee sharcigu oggol yahay iyo dhinacyda baabuurka ee sharcigan lagu qeexay.

QEYBTA IV
WAXYEELLEYNTA DHISMEYAASHA DANTA GUUD

Qodobka 31aad
Soo-saaridda Shahaadada kharashka

Marka uu qof sababo dhaawac/waxyeello dhismeyaasha biyo-mareenka (marshobiyeedi) waddooyinka ama qaabka waddada ama agabkeeda, wasiirka ama sarkaalka idman wuxuu soo-saarayaa shahaado caddeyneysa qaddarka lacageed ee habka waxyeellada la geystay.

Qodobka 32aad
Kharashka dib-u-hagaajinta

Marka qof wax u dhimo/dhaawac gaarsiiyo buundo (bridge) ama marin kale, wuxuu gelayaa xad-gudub, waana in uu Wasaaradda siiyaa mag-dhaw ama uu sidoodii ku soo celiyaa meelihii uu waxyeellada gaarsiiyey, hadba sida uu Wasiirku tilmaamo.

Qodobka 33aad
Qaadidda Ganaaxyada

Dhammaan ganaaxyada xamuulka aan caadiga ahayn ama xad-dhaafka ah iyo ganaaxyada lagu qabto sharcigan awgiis waxaa qaadaya Wasaaradda Maaliyadda, Xukuumadda JFS.

QEYBTA V
QODBBO QUBANE AH

Qodobka 34aad
Xeyndaabka Dabaqaadda Sharcigan

1. Qofka loo idmay in uu guto waajibaadka iyo awoodaha Sharciga Baabuurta Xamuulka qaada ee Soomaaliya, marka uu gudanayo waajibaadkaas:
   b) Wuxuu si madax-bannaan u gudan karaa waajibaadkaas Dawlad kale gudaheed, hadba sida waafaqsan Shuruucda dalka;
   t) Wuxuu si madax-bannaan u gudan karaa dhammaan waajibaadka saaran iyo awoodihiisa Soomaaliya dhexdeeda, isagoo matalaya Dawlad kale si waafaqsan sharciga Dawladdaasi; iyo
   j) Wuxuu si madax-bannan u gudan karaa dhammaan waajibaadka saaran iyo awoodihiisa Dawlad kale marka uu joogo, isagoo matalaya si waafaqsan sharciga Dawladdaasi.

2. Waajibaadka iyo awoodaha lagu sheegay faqrada (1) ee qodobkan, waxaa kamid ah, awoodda gudashada shaqo kasta ee lagu xusay sharcigan.

Qodobka 35aad
Aqoonsi isku mid ah ee Shahaadooyina Miisaamidda

1. Wasiirku wuxuu heshiis la geli karaa wadan kale, heshiiskaas oo keenaya in si isku mid ah loo aqoonsado shahaadooyinka miisaamidda ee lagu soo-saaro si waafaqsan sharcigan, iyadoo marka loo eego heshiiskaas, aysan ka reebeyn wadaha waajibaadka sharciga ku cad ee Shuruudaha miisaamidda.

2. Ma jiraan qeybtaan wax u diidaya in sarkaalka idman uu ka dalbo baabuurka wata shaahadada miisaanka ee sida faqrada (1) lagu xusay, in haddana la miisaamo si waafaqsan sharcigan.

Qodobka 36aad
Ganaaxyada Ugu Yar Ee Laga Qaado Rarka Xad-dhaafka Ah

Xadka ugu yar ee ganaaxyada laga qaado rarka xad-dhaafka waa sida lagu caddeeyey qeybta (B) ee Jadwalka Sharcigan.

Qodobka 37aad
Wareegto

1. Wasiirku, isagoo latashanaya qeybaha ay khuseyso, wuxuu soo-saari karaa wareegto ku saabsan wax kasta ee sharcigan lagu tilmaamay oo ay kamid yihiin:
   b) Xadka xamuulka ee sharciga ah;

t) Ganaaxyada xamuulka xad-dhaafka laga qaado;
j) Ganaaxyada laga qaado rarka aan caadiga ahayn iyo rarka xad-dhaafka ah ee shuruudaha dheeriga ah ee ku saabsan xamuulka aan caadiga ahayn iyo kan xad-dhaafka ah ee sharcigan lagu xusay;
x) Hab-raacyada Maamulka iyo baaritaanka maaliyadda ee lagu dabaqayo marka la qaadayo lana xisaabinayo ganaaxyada rarka xad-dhaafka ah; iyo
k) Cabbirka dhinacyada baabuurta.

2. Wareegtada waxaa lagu caddeyn karaa ciqaabaha ka dhalan kara u-hoggaansan-la'aanta arrimaha wareegtada lagu soo-saaray iyo ganaaxyada joogteynta iyo ku noqoshada xad-gudubyadaas.

3. Awoodda soo-saaridda wareegto waxaa ku jira awoodaha joojinta iyo mamnuucidda gebi ahaanba ama shardiyeynta wax kasta oo la xiriira sharcigan ee arrin kasta ama shay kasta.

4. Wasiirku, inta uusan soo-saarin ka hor wareegto ku saabsan xadka sharciga ah ee xamuulka, cabbirka dhinacyada baabuurta, ganaaxyada xamuulka xad-dhaafka ah ama aan caadiga ahayn, wuxuu ogeysiinta xaddeyntan iyo ganaaxyadan ku daabacayaa Faafinta Rasmiga ah, waxaana lagu shaacinayaa wargeysyada ugu afka dheer dalka si qof kasta ee ay khuseyso uga aragti dhiibto..

QEYBTAVI
QODOBBO KAMA-DEMBAYS AH

Qodobka38aad
Xilliga Kala-guurka

Inta uu si buuxda uga dhaqan-gelayo sharcigan waxaa lagu sii dhaqmayaa shuruucdii horay u jiray ee dalka.

Qodobka 39aad
Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey Xeer kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon Karin Sharcigan.

.

Qodobka 40aad
Dhaqan-gal

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo-saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

JADWAL
QEYBTA (A) (a.29 (1))
Cabbirka iyo Culeyska ugu badan ee baabuurta

Jadwalkan soo socda waa xadeynta cabirrada iyo culeysyada baabuurta ee Soomaaliya:

1. Cabirrada ugu badan ee lagu tallinaayo oo mitir ah:

Ballaarka guud Overall width	–	2.60 m
Joogga guud	–	4.60 m
Dherarka guud	–	22.00 m
Dherarka guud ee isjiidyada	–	18.60 m
Dherarka guud ee gawaarida tareellayaasha ee leh laba candho	–	15.00 m
Dherarka guud ee gawaarida tareellayaasha ee leh saddex candhon	–	16.20 m

1. Culeyska/miisaanka ugu badan ee lagu tallinayo oo mitir tan ah:

Culeys hal candho	–	8.20 t
Candhooyin isu dhow oo laba lugoodle ah	–	16.50 t
Saddex candho	–	24.60 t

Culeyska guud ee baabuurt:
Baabuurta waaweyn (taraag) iyo rimoorrada leh Shan wax ka badan shan Candho - 53.00 t

2. Ballaca ugu badan ee dhinacyada baabuurga ee la oggol yahay ee mitir ah

Baabuur	
	Mitirri
Ballaca/ballaarka guud	2.60
Joogga guud	4.60
Dherarka guud	
Gawaarida aan laabmin ee hal candhoole ah	6.00
	12.00
Gawaarida aan laabmin ee laba candhoole ahGawaarida aan laabmin ee saddex candhoole ah	12.00
	12.00
Basaska hal candhoolayaasha ah	
Basaska laba candhoolayasha ah	15.00
	16.00
Tareellayaasha laba candhoolayaasha ah	
Tareellayaasha saddex candhooleyaasha ah	18.60
	22.00
Baabuurta iyo rimoorrada afar candhoolayaasha ah	
Baabuurta iyo rimoorrada shan candhoolayaasha ah	

3. Culeyska ugu badan oo mitir tan ah:

Baabuurta	
	Tan
Kuwa laba candhoolayaasha ah	18.00
Kuwa saddex candhoolayaasha ah	22.00
Kuwa afar candhoolayaasha ah	40.00
Basaska laba candhoolayaasha ah	18.00
Basaska saddex candhoolayaasha ah	22.00
Tareellayaasha saddex candhoolayaasha ah	22.00
Tareellayaasha afar candhoolayaasha ah	32.00
Baabuurta iyo rimoorrada shan candhoolayaasha ah	40.00
Culeyska ugu badan ee Candhada:	8.20
Hal candho oo laba lugoodle ah	10.00
Hal candho oo afar lugoodle ah	16.50
Candhooyin isku-xiran oo laba lugoodle Saddex lugoodle	24.60

Xadka Sharciga ah ee Gawaarida

Culeyska ugu badan ee Candhada ee la oggol yahay

	Kooxaha Candho (ee leh taayarrada aariyeysma)	Ugu badan Culeyska Candhada (Kg)
A	Candhada hoggaamisa (2 lugood – taayarri keli-keli ah)	8,000
B	Candho keli ah (4 lugood –taayarro labo-labo ah)	10,000
C	Koox candhooyin isku-xiran (8 lugood-taayarro labo-labo ah)	16,000
D	saddex candho (12 lugood- taayarro labo-labo ah)	24,000

Culeysyada ugu badan ee baabuurga

	Baabuurga qaabka Candhooyinka (Taayarrada aariyeysma)	Ugu badan Culeyska guud ee baabuurga
A	Baabuur laba candhoole ah	18,000

B	Baabuur 3 candhoole ah	24,000
C	Baabuur iyo isjiid guuda ahaan 3 candhoole ah	28,000
D	Baabuur 4 candhoole ah	28,000
E	Baabuur iyo isjiid guuda ahaan 4 candhoole ah	34,000
F	Baabuur iyo kurimoor guud ahaan leh 4 candho	36,000
G	Baabuur iyo isjiid guuda ahaan 4 candhoole ah	42,000
H	Baabuur iyo kurimoor guud ahaan leh 5 candho	42,000
I	Baabuur iyo isjiid guuda ahaan 6 candhoole ah	48,000
J	Baabuur iyo kurimoor guud ahaan leh 6 candho	48,000

QEYBTA (B) (a.36)

Darajada Candho walba Guud ahaan Rarka xad-dhaafka ah ee culeyska baabuurga oo Kg ah	Ganaaxyada ugu yar ($)	
	Ganaaxa marka koowaad ah	Ganaaxa marka labaad ama xadgudubka joogtada ah
Wixii ka yar 1,000kgs	$ 20	$40
1,000 kg ama ka badan balse ka yar 2,000kgs	$40	$ 80
2,000 kgs ama ka badan balse ka yar 3,000kgs	$ 60	$ 120
3,000 kgs ama ka badan balse ka yar	$80	$ 160

4,000kgs		
4,000 kgs ama ka badan balse ka yar 5,000kgs	$ 100	$ 200
5,000 kgs ama ka badan balse ka yar 6,000kgs	$ 120	$ 240
6,000 kgs ama ka badan balse ka yar 7,000kgs	$ 140	$ 280
7,000 kgs ama ka badan balse ka yar 8,000kgs	$ 160	$ 320
8,000 kgs ama ka badan balse ka yar 9,000kgs	$ 180	$ 360
9,000 kgs ama ka badan balse ka yar 10,000kgs	$ 200	$ 400
10,000kgs ama ka badan	$ 220	$ 440